

Xeerka siddeeda qof oo bilaabanaya 24-ka Noofambar

Faafitaankii cudurka sare ayuu u sii kacayaa. Sidaa darteed waxaa lasoo jeedinayaa talooyin dhowr ah iyo xayiraadyo hadda. Lama ogola in kabadan 8 qof in ay ku kulmaan, goobaha bulshadu ku kulanto, goobaha tartamada iyo Bandhigyada.

Dawladda, hay'adda caafimaadka iyo hay'adaha kale ee waddanka waxay isku daya yaan iney joojiyaan faafidda cudurka. Sidaa darteed baa sharciyo cusub loo soo saaraayaa. Sharciyada qaarkood waddanka oo idil bay khuseeyaan, qaarna waxay gaar u yihiin gobollada qaarkood.

Sharciyada ugu muhiimsan waxay khuseeyaan waddankoo idil: Kala fogaanshaha, dhaqidda gacmaha, in guriga lagu ekaado haddii laysku arko astaamaha cudurka Karoonaha (Covid-19)

Sharci cusub oo waddanka oo idil khuseeyaa waa in aaney "goobaha bulshadu ku kulmaan" isugu iman karayn in ka badan 8-qof. Tan kaliya ee laga soo reebay waa duugista oo loo ogolyhay 20 qof in ay ka qayb galaan.

Sharcigan cusub wuxuu ka dhigan yahay in booliisku awood u leeyahay iney joojiyaan kala diraan, kulamada ay dad badani isugu yimaadaan. Qofka abaabulaa in dad badani isu yimaadaan waxaa lagu xukumii doonaa ganaax ama xabsi ilaa 6 bilood ah.

Sharcigu wuxuu hirgali doonaa 24-ka bisha Nofeembar kaas oo dhaqan galkiisu soconayo muddo 4 todobaad ah. Haddii xaaladdu aaney ka soo fiicnaanin, sharcigan xayiraadda ah ayaa sii socon doonaa illaa iyo Kirismaska iyo sanadka cusub.

Sharci cusub oo khuseeya guryaha dadka da'da ahi deggan yihiin.

Gugii iyo bilowgii xilligii dayrta waxaa mamnuuc ahaa in lasoo booqdo guryaha dadka waaweyni ay

deggan yihiin. Kadib dib baa loo ogolaaday, laakiin hadda cudurkii baa soo noqday. Sidaa daraadeed waxay dawladdu go'aansatay in hay'adda caafimaadku go'aamiso in sharcigii joojinta booqashada lasoo celiyo iyadoo loo fulinayo gobol gobol. Taasi macnaheedu waa waddanka oo idil kama sinna sharciga oo meelaha loo arko iney muhiim tahay unbaa lagu fulinayaa sharciga booqashada.

Sharcigan wuxuu kii hore kaga duwan yahay, qofka deggan guryaha dadka da'da ah wuu la kulmi karaa xaaskiisa ama seygeeda ama qofka ay wada noolyihiin. Markii hore sidaa ma ahayn. Haddii aad soo booqanayso guryaha dadka da'da ah waa inaad wacdaa marka hore intaadan iman.

Waana laga bilaabo 21 Nofeembar ilaa iyo bisha Febraayo 2021.

War wanaagsan- tallaal baa mar dhaw imanaya.

Shirkado badan oo ah kuwa daawooyinka ayaa soo saaraya tallaal. Dad badan baa aaminsan in tallaalka cudurka Karoonaha diyaar noqon doono bilowga sanadka soo socda. Laakiin talaalka dadkoo idil mawada helayaan marka hore. Ugu horreyn waxaa la talaalayaa dadka da'da ah, kuwa xanuunsan iyo kuwa ka shaqeeya caafimaadka.

Haddii wax waliba sida loogu talo galay noqdaan dadka Iswiidhan deggan oo idil wuu gaarayaa tallaalka xilliga dayrta ee 2021-ka. Laakiin hadda lama oga.

Tusaale – Kullanka bulshada

Waa mudaharaadka, mu'tammarada guud, kulan diimeedyada, tiyaatarada, riwaayadaha iyo wixii soo raaca.

Tartan iyo Bandhigyo

Waxaa looga jeedaa, tartamada cayaaraha, cayaaraha fudud, goobaha la isku maaweeliyo, suuqa, carwooyinka.

Iskuulada, gaadiidka dadweynaha, dukaamada kuma jiraan. Waxaan kaloo aan ku jirin kulamada gaarka ah, laakiin dawladdu waxay rajeyneysaa in dadku fahmaan xaaladda, oo aaney u kulmin si tiro badan ah.



Labadii wiigba marbaan warqaddan warbixinta soo saari doonaa. Qoraalkan warbixinta ah waxaa soo diyaariyey, hay'adda xaaladaha degdegga ah ee gobolka. Hay'adda xaaladda deg degga ah ee gobolka Kalmar waa wada shaqeyn ka dhaxaysa dhammaan degmooyinka gobolka, gobolka, hay'adda caafimaadka ee gobolka iyo mas'uuliyiin kale oo gobolka ah. Markay xaalad deg deg ahi ka dhex dhacdo bulshada, si wada jir ah baynu isu caawinnaa.



facebook.com/krissamverkan.kalmar

Kalmar kommun

